



Ma og tahay?



- ▷ In dhammaan dhallinyarada ku nool Noorway ay xaq u leey-ihii 3-5 sano oo waxbarasho dugsi sare oo lacag la'aan ah
- ▷ In kastoo aad doorato waxbarashada xirfadda, waxa kale oo aad qaadan karta is dhishid si aad u bilawdo jaamacad ama waxbarasho sare
- ▷ Haddii aad haysato warqadda xirfadda, markii ba waad shaqayn kartaa. Laakiin haddii aad qaadato waxbarashada guud, waxa lagaa rabaa in aad ugu yaraan saddex sannadood aad wax dhigato.
- ▷ Waxa jira xirfado badan oo aan u baahnayn aqoon badan, laakiin laga helo mushahar wanaagsan



Ku saabsan MiR

Multikulturelt Initiativ og Ressursnettverk waa shabakad qaabilسانهالیدیinta, carruurta iyo dhallinyarada oo ka madaxbannaan qoomiyad iyo bulsho meel ka soo jeedda. Annaga oo ka duulayna dhaqannada ka la duwan waxa aanu bixinnaa macluumaa, taloojin iyo taageerooyin ku aaddan arrimaha la xidhiidha xannaanada carruurta, dugsiga, nolosha qoyska iyo ta bulshada ba. Sida oo kale MiR waxa uu u shaqeeyaa in uu u hadlo qaybo bulshada ka mid ah ah, si ay u la kulmaan dawladda iyo bulsho weynta ba.

Himilada MiR waxa weeyaan inay noqdaan birijika u dhexeeyaa waalidiinta, carruurta, dhallinyarada iyo bulsho weynta ba, si uu kor ugu kaco nololwanaaggū; is fahamka wada jirka ah iyo ka wada qaybqaadashadu ba waa wax maxsuul guud u wada ah. Ururku waxa uu ka madaxbannaan siyaasayadda iyo diimaha ba.

Shabakadaha waxtarka leh:


vigo.no
utdanning.no
vilbli.no
velgriktig.no
nhoung.nho.no
yrke.no



Waa Taageeray:
Bufdir

Multikulturelt Initiativ og Ressursnettverk
Torggata 31, 0183 Oslo
Telefon: + 47 46511176
Email: post@mirnett.org
Nettside: www.mirnett.org

Dhallinyarada iyō Doorashada Waxbarashada



SOMALI
Multikulturelt Initiativ og Ressursnettverk



**Waalidiinta oo dhami
waxay carruurtooda la
jecel yihiin wanaagga...**

**... laakiin waalidiintu mar
walba miyey kuwa yihiin
kuwa sida saxda ah og?**

Hada carruurtaada waxay qaadanayaan doorasho muhiim ah. Wuxuu habboon in waalid ahaan aad ka taageerto sidii ay u qaadan lahaayeen doorashooyin wanaagsan, oo taabanaya naftiisa iyo mustaqbalkiisa.



Haddii ilmahaagu aanu jeclayn in uu akhriyo buugaagta iyo inuu wax dhigto ba, wuxuu flican in uu doorto waxbarasho xirfadeed!



Ma og tahay in koronto yaqaanku uu heli karo mushahar bilow ah oo ka sarreeya mushaharka uu uu qaato macallinku?



Wuxuu jira shaqooyin badan oo aad kasban karto lacag badan, adiga oo aan lahayn aqoon sare.



Waxbarashada, xirfadda iyo jinsiga

Waxbarashooyinka iyo xirfadaha ku ka la habboon innamadda iyo habluhu way ka la geddisan yihiin, oo waddamadu na way ku ka la duwan yihiin. Xirfado badan oo raggu ku badan yihiin waxay ka helaan dakhlii fiican iyo maamuus. Noorwey se dhammaan waxrashooyinka iyo xirfadaha si siman ayey u dooran karaan hablaха iyo innamadu ba. Xirfado badan oo la qabtaa waxa laga helaa mushahar wanaagsan iyo shaqo sugaran.

Shaqada wanaagsani waxay sababtaa madaxbannaani. Sidaa darteed, ma noqonaysid qof ku tiirsan cid kale.



*Sannadihii u danbeeyey
hablo badan ayaa qaatay
waxbarasho sare marka loo
eego innamada. Inantaadu
ma ka mid ahayd?*

Dhallinyaradu waa in ay si xor ah u doortaan waxbarashada iyo xirfadda, iyada oo loo eegayo xiisahooda, kartidooda iyo rabitaankooda mustaqbalka.

Si wada jir ah u raadiya xalal wanaasan!

Waalid ahaan, qabaabka soo socda ayaad dhallinyarada uga caawin kartaan inay qaataan go'aanka saxda ah:


- ▷ Dhegaso waxa ay carruurtu rabto! Waa noloshooda ee maaha taada!
- ▷ Xirfadahee ugu fudud oo shaqo lagu heli karaa?
- ▷ Ka qaybqaado kulannada xog isa siinta ee dugsiga iyo inaad booqato bandigyada waxbarashada ee ka dhaca meesha aad ku nooshahay
- ▷ Dhammaan dugsiyadu waxay leeyhiin la taliye qaabilisan waxbarashada iyo dugsiga ba. Ma la hadasheen iyada ama isaga?



*Riyooyin
nooce ah
ayey carruur-
taadu ku taa-
mayaan mus-
baqbalka?*



*Ma ka la
hadashay
carruurtaada waxay
jecel yihiin in
ay samee
yaan?*



*Maxaa
macquul
ah oo la
xaqiijin
karaa?*

*Aqoon fiican
ayaad u leeda-
hay carruurta-
ada iyo waxay
ku fiican yihi-
in ba!*